



waxaan idin farayaa Ilaahay cabsidi, iyo inaad maqashaan oo adeecdaan midka idiin madaxda ah hadii xataa uu yahay adoon xabashi ah, waxaad arki doontaan gadaashayda muran iyo is khilaaf daran, waxaan idiin dar-daarmayaa sunadayda iyo sunada khulafaa'u raashidiinta hanoonsan ee iga dambaysa-

Cirbaad Binu Saariyah Ilaahay ka raali ahaadee wuxuu yiri: Nabigaa naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee maalin ayuu na dhex istaagay oo na wacdiyey, wacdi xeel dheer oo quluubteenu cabsatay, indhahayaguna ilmeeyeen, waxaana lagu yiri: Rasuulka Ilaahayow waxaad na wacdiday wacdi sagootin ah ee noo samee balan qaad, wuxuu ku yiri: " waxaan idin farayaa Ilaahay cabsidi, iyo inaad maqashaan oo adeecdaan midka idiin madaxda ah hadii xataa uu yahay adoon xabashi ah, waxaad arki doontaan gadaashayda muran iyo is khilaaf daran, waxaan idiin dar-daarmayaa sunadayda iyo sunada khulafaa'u raashidiinta hanoonsan ee iga dambaysa-, gaws dambeedka ku qabsada, waxaan idiinka digayaa wax kastoo diinta lagu soo daro, bidco kastaana waa baadi ".

[Xadiis Saxiix ah] [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At-Tirmidi, Ibnu Maajah, Iyo Axmed]

Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-wuxuu wacdiyey asaxaabtiisa wacdi xeel dheer, taasoy quluubta cabsi gelisay, indhuhuna la ilmeeyeen. Waxay dheheen -asaxaabtu-Rasuulka Ilaahayow, waxay u eg tahay waano sagootin ah, waa markay arkeen siduu ugu xeel dheeraaday Nabigu- naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- waanada, waxay way diisteen dardaraan ay qabsadaan gadaashiisa. Wuxuu ku yiri: waxaan idiin dardaarmayaa Ilaahay cabsidi, idinkoo la imaanaya waajibaadka , kana tagaya wixii la xarimay. iyo inaad maqashaan oo adeecdaan madaxdiina, xataa haduu madax idiin noqdo adoon ama uu xoog idinku qabsado, yacni, haduu madax idiin noqdo dadka kan ugu liita ha nicina ee adeeca, iyadoo laga baqayo fitan, qofkii idinka mida ee noolaada wuxuu arki doonaa khilaaf badan. Ka dib wuxuu u sheegay sida looga bixi karo khilaafkaas, taaso ah in la qabsado sunada Nibiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-, iyo sunada khulafad Raashidiinta ah ee mahdiyyiinta ah ee isaga ka dambeeya, kuwaasoo ah: Abii Bakar Asidiq, Cumar Binu Khaddaab, Cusmaan Binu Cafaan, Cali Binu Abii Daalib,-Allah ka raali ahaado dhamaantoode-, hadalka Rasuulka ee ah: "caduu calayhaa bina-waajidi" waa gawsaha danbe, oo uu uga jeedo in sunada la qabsado oo lagu taagnaado. Wuxuu uga digay wax kastoo diinta lagu soodaro oo bidca ah, waayo bidco walba waa baadi.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

